

Shibbanayaasha labanlaabma (Bruken av doble konsonanter)

Qiiro ayuu af kastaa leeyahay. Waa qiiro weyn oo dadka qaarkii murugo ku beerta marka ay arkaan garwaaqsi ahaan gefafka, gawl gawlka iyo xadgudubyada dadka qaar afkaas ka gelayaan marka ay ku hadlayaan, gaar ahaanna marka ay wax ku qorayaan. Maalin baa meel

Internet Café ah oo ku taalla magaalada London waxa soo gelaysa Islaan aad u da' weyn oo Ingiriis ah. Waxa ay isla markiiba dhaadaysaa oo isha la helaysaa warqad wargelin ahayd oo meel derbiga ka mid ah ku dhejisanayd oo xanbaarsanayd qoraal gibin ah oo Af-ingiriis ah. Waxa qoraalkaas ereyada ku qornaa ka mid ahaa kelmedda **ACCOUNT** oo si kama' ah ugu qornayd **ACOUNT**. Islaantu waxa ay judhiiba dareentay khaladkaas meesha ku jira. Iyada oo haddaba muraaradillaac ah, ayay inankii meheradda hayey, waxa ay si naxariis leh, uga codsatay inuu ama kelmeddaas xaqeeda mariyo oo ka saaro khaladka ku jira ama uu meesha wargelintaas ka fujiyo. Qiiradu waxa sii badanaysaa oo heerka argagaxa ku sinmaysaa haddii la eego Af Soomaaliga dadka intiisa badani qoraan iyo sida aan in badani ugu aabbayeelin sida ereyadu u qormaan, gaar ahaanna xarfaha ama shibbanayaasha labanlaabma ee Afka Soomaaliga. In kasta oo qaar kale jiri karaan, haddana sida Guddidii Afka Soomaaligu isku raaceen sannadkii 1972, toddoba ka mid ah shibbanayaasheenu way labanlaabmi karaan. Tilmaan ahaan waxa toddobadaas shibbane lagu baadi soocdaa labadan weedhood; **Ma nala garaad baaBadar galaamayn** Sida muuqata toddobadaas shibbane ee labanlaabmaa waxa ay kala yihiin sida alfabeetada ay ugu kala horreeyaan: **b d r g l m n (B D R G L M N)**. Mar kasta shibbanayaashaasi ma labanlaami karaan, hase yeeshee waxa lama huraan ah in maraxadaha qaarkood la labanlaabo haddii kale se la gelayo khaladaad waaweyn oo mararka qaarkood dhiillo culus ah mar xagaafka la iska qaadsiiyo ee aan loo ab iyo isir eegin. Tusaale ahaan, waxa marar badan lala kulmaa war sidan u dhigan: Caasha waxa loo

magacaabay **wasiirada** caafimaadka. Golaha **wasiiradu** waxa uu ka kooban yahay sagaal rag ah iyo haweenaydaas. Caashi waa wasiirad. Marka qodobka “da” la raaciyo waa in ay noqotaa wasiir**adda**. Haddii aan sidaas la yeelin oo loo qoro **wasiirada** waxa noqonaysaa wadartii ama jamacii **wasiir** oo weli isna khalad ku sii jiro oo ah **wasiirro = wasiirrada**. Qaybta labaad ee warkeenna oo ku saabsan wasiirrada oo dhan waxa aynu u qornay **wasiirada** oo dhawaaq ahaan ereygu jabnaanayo haddii aan xarafka “r-da” carrabka lagu adkayn ama aan la shedin, waxaana sax ah in loo qoro “wasiirrada” sida aynu xagga sare ku soo taabannay. Waxa taas u dhiganta labka iyo dheddigga wakiil. **Wakiilad x wakiil**. **Wakiiladda** oo ah haweenay waxa qoraalkeedu ka duwan yahay wadarta wakiil oo ah **wakiillo** oo marka qodobka la raaciyo u dhigmaysa **wakiillada**. Bal ha loo fiirsado kala geddisnaan wakiil**adda** iyo wakiillada. Tusaaleyaal kale: Bog waxa uu mar la macne yahay xaashida ka midka ah buugga, mar kalena waa xubin ka mid ah jidhka gudaha ee aadanaha ama xoolaha. Haddii qodob la raaciyo waxa uu u qormayaa **bogga**. Haddii aynu labanlaabkaas ka il-duufo waxa soo baxaya **boga** oo ah hal magaceed (Boga). Hashayadii Boga bogga laga hayaa X Hashii Boga **bogaa** laga hayaa. Labanlaabka ayaa kala duwaya sidaas oo kale macnayaasha ereyadan soo socdana: Carab carrab la’ ayaa carruurtala cayaarayey markii Cali kub**adda** uu Cabdi kubada kaga dhuftay. Cabdi weli **kubadaa** xanuunaysa ka dib markii ay **kubbaddu** ka haleeshay. **Sallaan** buu fuushanaa markii Cali uu **salaan** wacan na siiyey. **Dhammaan** caanaha way **dhamaan**. In marka shibbanuhu labanlaabmayo la gartaa waa wax fudud. Dhawaaqa ayaa dhegta iyo carrabkuba dareemi karaan oo lagu kala saari karaan in ninka **Carabka** ah ee reer Ciraaq iyo xubinta jidhkiisa ka midka ah ee **carrabku** ay ku kala duwan yihiin shedka ku dhacaya xarafka “r-da” ee xubinta jidheed ee **carrab** oo haddii shedku ka baxo noqonaysaa nin ama haweeney Carab ah. **Qodobbada Farta Soomaalida** Meelaha kale ee had iyo gooraale lagu khaldamaa waa marka uu qodob raacayo ereyada qaarkood, gaar ahaan marka

ereyadaasi ku dhammaadaan shibbaneyaasha “d” ama “g” ee ay raacayaan qodobbada “da” ama “ga”.Qodobbada Afsoomaaligu waa toddoba:a, ta, da, sha, ga, ka iyo ha.Qodobbadu magacyada ayay raacaan oo tilmaan garasheed siiyaan.Tusaaleyaal:**Qodobka “a”**Loox = looxaLibaax = libaaxaGeel = geela**Qodobka “ta”**Tib = tibtaDhallin = dhallintalb = ibta**Qodobka “da”**Nabad = nabaddaColaad = colaaddaLo’ = lo’da**Qodobka “sha”**Il = ishaUl = ushaDhiil = dhiisha**Qodobka “ga”**Doog = dooggaTaag = taaggaGuri = guriga**Qodobka “ka”**Kalluun = kalluunkaBannaan = bannaankaDhul = dhulka**Qodobka “ha”**Caano = caanahaCune = cunahaWaxaro = waxarahaSida qodobbadu ka marag-kacayaan magac kasta oo Afsoomaali ah haddii uu ku dhammaado shibbaneyaasha “d” ama “g” marka uu qodobku raacayo waxa khasab ah in labanlaab yimaaddo.**Tusaaleyaal “da”:**Wasaaradda, dawladda, xukuumadda, Jamhuuriyadda, siyaasadda, waddaniyadda, dimoqraadiyadda, daacadda, madbacadda, qaafiyadda, daaqadda, daasadda, nadaafadda, warqadda, doodda, nabadda, colaadda, niyadda, durriyadda, qabyaaladda, diyaaradda, majarafadda, laambadda, badda, dalladda, maddiibadda, malqacadda, xawaaladda, maaliyadda, shirkadda

iwm**Tusaaleyaal “ga”**Bogga, doogga, diigga, dhiigga, taagga, tuugga, togga, aagga, udugga, unugga, adeegga, edegga, buugga, dheegga, dhuugga, duugga, laagga, mugga, maragga, ruugga, ragga iwm.Runtii maalin kasta waxa khaladaad aan loo aabbayeelayn lagula kulmaa qoraallada ku soo baxa inta badan jaraa’idka iyo mareegaha internet-ka, gefafkaas oo in badan oo ka mid ahi ka soo jeedaan dhayalsi lagula kaco shibbanayaasha labanlaabma si ula-kac iyo aqoon la’aaniba ku jirto. Dhinaca kale waxa aad arkaysaa shirkad ama hay’ad dhan oo magaceedu si khaldan u qoran yahay sida **Xawaalada** “X iyo Y” ama **wasaarada** “X iyo Y” iyo **Jamhuuriyada** “X iyo Y” iwm.Qiirada afku waa in gefafka looga damqadaa oo qof kasta oo wax ku qorayaa u tadhaa, teellana u dhigtaa xeerarka jira ee la isku

Bruken av doble konsonanter på somali

raacsan yahay, haddii xagaafka la iska qaadsiiyo oo la gawl gawlo, sidii neef adhi ah oo waraabe orod ku fayl faylayona, ay ku dhiillo gelisaa oo laga dhawaaqaa.

Qore Mohamed Baashe Xaji Xasan